## Xuquuqahaaga

Marka ay timaado macluumaadkaaga caafimaadka, waxaa aad leedahay xuquuq cayiman. Qaybtani waxaa ay sharaxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah waajibaadka naga saaran in aan ku caawinno.

### Hel nuqul elektiroonig ah ama warqada diiwaankaaga caafimaad

- Waad weydiisan kartaa in aad aragto ama aad hesho nuqul elektiroonig ah ama warqada diiwaankaaga caafimaad iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee aannu kaa hayno. Na weydii sida loo sameeyo.
- Waxaa aan ku siin doonaa nuqul ama warbixin kooban oo ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad, badanaa 30 maalmood gudahood kadib markii aad codsi soo dirsatid. Waxaa laga yaabaa in aan kaa qaadno lacag macquul gal ah, oo ku saleysan kharashaadka ku baxaaya adeega.

### Naga codso in aan saxno wax kaste oo khalad ah oo ku jira diiwaankaaga caafimaad

- Waxaa aad na weydiisan kartaa in aan saxno macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan oo aad u malaynayso in ay khaldan yihiin ama aan dhammaystirnayn. Na weydii sida loo sameeyo.
- Waxaa laga yaabaa in aan "diidno" dhahno codsigaaga balse sababta ayaa waxaa aan kugu soo sheegi doonnaa qaab qoraal ah 60 maalmood gudahood.

### Codso in qaab qarsoodi ah lagula soo xiriiro

- Waxaa aad na weydiisan kartaa in aan si gaar ah kula soo xiriirno (tusaale ahaan, in aan telefoonka guriga ama xafiiska aan kala soo xiriirno) ama aan warqad kugu soo dirno cinwaan kale.
- Waan aqbali doonnaa dhammaan codsiyada macquulka ah.

### Na weydiiso in aan xadidno waxa aan isticmaalno ama wadaagno

- Waxaa aad na weydiin kartaa in aanan u isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaadka qaarkood daaweynta, lacag bixinta, ama howlaheena shaqo.
- Nalooga ma baahna in aan aqbalno codsigaaga, waxaana laga yaabaa in aan diidno haddii ay saameyn ku yeelanayso daryeelkaaga.
- Haddii si buuxda jeebkaaga aad lacag uga bixiso adeeg ama shay daryeel caafimaad ah, waxaa aad naga codsan kartaa in aanan macluumaadkaas wadaagin iyadoo ujeeddadeena ay tahay in aan lacag ku helno ama aan uu adeegsanno howlaheena la xiriira caymiskaaga caafimaad.
- Waan aqbali doonnaa codsigaas marka laga reebo xiliyada sharcigu inooga baahdo in aan wadaagno macluumaadkaas.

### Soo hel liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadka

- Waad codsan kartaa liiska (tirada) waqtiyadii aan la wadaagnay macluumaadkaaga caafimaad lix sano ka hor taariikhda aad codsiga soo dirsatay, cidda aan la wadaagnay, iyo sababta.

### Hel nuqulka ogeysiiskan asturnaanta

- Waad codsan kartaa nuqul ogeysiiskan oo warqad ah wakhti kasta, xitaa haddii aad ogolaatay in qaab elektaroonig ah aad ku hesho ogeysiiska. Waxaa aan si degdeg ah ku siin doonaa nuqul warqad.

### Xullo qof adiga kuu matala

- Haddii aad qof siisay awood qareennimo oo uu kugu matali karo hawlaha dhanka caafimaadka amaba uu yahay sharciyan mas'uul ka ah, qofkaasi waxaa uu adeegsan karaa xuquuqdaada oo waxaa uu sameyn karaa xulashooyin ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaa aan hubin doonnaa in uu qofku leeyahay awooddan uuna adiga wax kuu qaban karno ka hor inta aan inagu tallaabo qaadin.


community health centers OF BURLINGTON

617 Riverside Avenue

Burlington, VT 05401

www.chcb.org

Khadka telefoonka ee bukaanka uu inoogu soo gudbin karo wixii jawaab celin ah: (802) 540-8253


Rev 05/2021

community health centers OF BURLINGTON

# Ogeysiiska Ku Dhaqanka Asturnaanta

## Macluumaadkaaga. Xuquuqdaada. Waajibaadkayaga.

Ogaysiiskani wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan loo isticmaali karo loona bixin karo iyo sida aad ku heli karto macluumaadkan. Fadlan si taxaddar leh dib ugu ee



## Xareyso cabasho haddii aad dareento in xuquuqdaada lagu xadgudbay

- Waad ka caban kartaa haddii aad dareento in aan ku xadgudubnay xuquuqdaada adigoo nala soo xiriiraya islamarkaana adeegsanaya macluumaadka ku yaalla bogga 1-aad.
- Waxaa aad cabasho uu gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka ee Xuquuqda Madaniga adigoo u diraya warqad cinwaanka 200 Independence Avenue, SW, Washington, DC 20201, adigoo wacaya 1-877-696-6775 ama waxaa aad booqan kartaa www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kama aargoosan doonno dacwadda aad xareysay awgeed.

## Xulashooyinkaaga

Macluumaadka caafimaadka qaarkood, waxaa aad noo sheegi kartaa xulashooyinkaaga ku saabsan waxa aan wadaagno. Haddii aad leedahay wax aad si cad uu doorbideysid oo ah sida aan ula wadaagno macluumaadkaaga xaaladaha hoos lagu sharaxay, nala hadal. Noo sheeg waxaa aad rabto in aad

samayso, waxaa aan raaci doonnaa tilmaamahaaga.

Xaaladahaan marka ay dhacan, waxaa aad xaq iyo xulasho u leedahay in aad noo sheegto

- La wadaag macluumaadka qoyskaaga, saaxiibbada kugu dhow, ama dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga
- La wadaag macluumaadka inta lagu jiro xaaladda gargaarka masiibada
- Waxaa aan kula soo xiriiri doonaa si aad uga qayb qaadato dadaallada lacag ururinta

Xaaladahan oo kale marka ay dhacan macluumaadkaaga ma wadaagi doonno illaa aad na siiso oggolaansho oo qaab qoraal ah

- Ujeeddooyinka suuqgeynta
- Iibinta macluumaadkaaga
- Inta badan wadaagida qoraalada cilminafsiga

### Xaga lacag uruurinta

- Waxaa laga yaabaa in aan kula soo xiriirno si aad uga qayb qaadatid dadaallada lacag uruurinta, laakiin waxaa sidoo kale aad noo sheegi kartaa in aan mar dambe kula soo xiriirin.

## Adeegsigayaga iyo Shaacinta

Sidee caadi ahaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad? Caadi ahaan waxaa aan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaadka siyaabaha soo socda.

### Daaweeyntaada

- Isweydaarsigeena macluumaadka caafimaadka elektiroonigga ah (HIE) ayaa u oggolaanayaa dhaqaatiirta, kalkaaliyeyaasha, farmashiistayaasha iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka in ay si habboon u helaan oo ay si ammaan ah ula wadaagaan macluumaadka caafimaad ee muhiimka ah ee bukaanka qaab elektaroonig ah - horumarinta xawaaraha, tayada, badqabka iyo qiimaha daryeelka bukaanka. Haddii aad rabto in aad ka baxdo Careequality, fadlan wac (802) -864-6309 kaaliyee ayaa si farxad leh kuu caawin doonaa.
- Waan kula soo xiriiri karnaa markii loo baahdo.
- Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad lana wadaagi karnaa xirfadleyda kale ee ku daweynaya.

### Caawinta caafimaadka bulshada iyo arrimaha badqabka

Waxaa aan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan dad kale markii looga gol leeyahay xaaladaha qaarkood sida:

- Ka hortagga cudurka
- Ka caawinta dib u soo celinta badeecada
- Ka warbixinta falcelinta xun ee dawooyinka
- Ka warbixinta xadgudub la tuhunsan yahay, dayacaad, ama rabshada guriga
- Ka-hortagga ama yareynta halista khatar ku ah caafimaadka qof kasta ama badqabkiisa

Sidee kale ayaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad? Waxaa na loo ogol yahay ama na looga baahan yahay in aan ula wadaagno macluumaadkaaga siyaabo kale - badanaa siyaabo wax ku biiriya danta bulshada, sida caafimaadka bulshada iyo cilmi baarista. Waa in aan ka soo baxnaa shuruudo badan oo sharciga ah ka hor inta aanan wadaagin macluumaadkaaga ujeeddooyinkan awgood. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/ understanding/consumers/index.html.

### Gudbinta kharashaadka adeegyadaada ku baxay

- Waxaa aan u isticmaali karnaa una wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad si kharashaadka kugu baxay aan uu dirno iyo si aan lacag uga helno qorsheyaasha caafimaadka ama hay'addaha kale.

*Tusaale: Waxaa aan macluumaadka adiga kugu saabsan siinaynaa qorshahaaga caymiska caafimaadka si markaas ay u bixiso lacagta adeegyadaada.*

### Sameynta cilmi baaris

- Waxaa aan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga cilmi baaris caafimaad.

### U hogaansamida sharciga

- Waxaa aan wadaagi doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada gobolka ama federaalka ay inooga baahdan in aan sidaasi sameyno taas oo ay ku jirto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay rabto in ay aragto in aan u hoggaansameyno sharciga federaalka ee asturnaanta.

### Ka jawaabida codsiyada tabarucida xubnaha iyo unugyada

- Waxaa aan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ururrada ka shaqeeya iibinta xubnaha.

### La shaqeeynta baare caafimaad

- Waxaa aan macluumaadka caafimaadka la wadaagi karnaa khubarada baara dhimashada degdega ah iyo wixii lamidka ah, baaraha caafimaadka ama agaasimaha aaska marka qof uu dhinto.

### Wax ka qabashada magdhowga shaqaalaha iyo codsiyada kale ee dowladda

Waxaa aan adeegsan karnaa ama wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan:

- Sheegashooyinka magdhowga shaqaalaha.
- Iyadoo lala kaashanayo hay'adaha kormeerka caafimaadka howlaha uu sharcigu oggol yahay.

Hawlaha gaarka ah ee dowladda sida militariga, amniga qaranka iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha.

### Ka jawaab dacwadaha iyo talaabooyinka sharciga ah

- Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan marka aan ka jawaabeyna maxkamad ama amar maamul, ama marka noogala yeero maxkamadda.

## Waajibaadkayaga

- Waxaa sharciga uu inooga baahan yahay in aan ilaalino asturnaanta iyo amniga macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo.
- Si dhakhso leh ayaan kuu ogeysiin doonnaa haddii xadgudub dhaco oo laga yaabo in uu waxyeelleeyay asturnaanta ama amniga macluumaadkaaga.
- Waa in aan raacno waajibaadka iyo hab-dhaqanka asturnaanta ee lagu sharraxay ogeysiiskan waxaanna ku siin doonnaa nuqul ka mid ah.
- Ma isticmaali doonno ama wadaagi doonno macluumaadkaaga marka laga reebo sida halkan lagu sharaxay waxaa aad sidoo kale aad inoo sheegi kartaa in aan ku soo gudbinno qoraal ahaan. Haddii aad noo sheegto waan karnaa, waxaa aad beddeli kartaa maskaxdaada waqti kasta. Qaab qoraal ahaan nagu soo ogeysii haddii aad bedesho go'aankaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/ understanding/consumers/noticepp.html.

*24-ka Oktoobar 2013-ka*

*Isbedelada Shuruudaha Ogeysiiskan*
*Waan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, isbeddelladana waxaa ay khuseeyaan dhammaan macluumaadka aan adiga kaa hayno.*
*Ogeysiiska cusub waxaa laga heli karaa kadib markii la codsado, xafiiskayaga, iyo boggayaga internetka.*

Ogeysiiskan Ku-Dhaqanka Asturnaanta waxaa uu khuseeyaa dhammaan goobaha Xarumaha Caafimaadka Bulshada ee Burlington, Inc.